

# Xuquuqda Goobta Shaqada

## OFCCP ayaa Kaa Difaacda Adiga Kala Takoorka Shaqada Marka La Joogo

### 1. Maxay tahay ku kala takoorka shaqadu?

Ku Kala Takoorka Shaqada ayaa guud ahaan jirta marka loo-shaqeeye uu ula dhaqamo cadsade ama shaqaale si ka gaabisa sida habboon kaliya aweed arrimaha ku saabsan jinsiyadda, midabka, diinta, jinsiga, asalka qaran, naafanimada, heerka ahaanta daljirenimada hore ee ilaashan. Wuxuu kala oo ay dhici kartaa haddii u loo-shaqeeye asluubeeyo, shaqada ka eryo ama ka qaado ficioo aan fiicnayn shaqaale ama shaqo cadsade markay ka hadlaan, muujiyaan ama weyddiyyaan arrimo ku saabsan lacag bixinta. Ku kala takoorka shaqada ayaa lagula kici karaa qof kaliya ama koox.

### 2. Waa maxay xuquudaydu?

Waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqayso jawi xor ka ah kala takoorka. Adiga laguugma diidi karo shaqo, oo laguguma samayn doono xasaradayn, xil hoos uga dhig, shaqo ka eryid, lacag bixin ka yarayn, ama laguu la dhaqmi si xun sababta oo ah jinsiyad, midab, diin, lab ama dheddig ahaan, ujeedka isku-tagga, isku aqoonsiga jinsiga, asal qaran, naafanimada, ama ahaan heerka ahaanta ilaashan ee daljiraha hore. Wuxuu kala oo aad xaq u leedahay inad ka hadasho, muujiso ama weyddiisid arrimaha ku saabsan bixintaada, bixinta dadka kula shaqeeeya, iyo bixinta ama loo fidhiyo shaqo cadsadeyaasha.

### 3. Miyay OFCCP hirgelisa sharciyada ku kala takoorka shaqada?

Haa. OFCCP ayaa hirgelisa Amarka Hoggaanka Sare ee 11246, Qaybta 503 Xeerka Dhaqancelinta, iyo Xeerka Gargaarka Arrimo Dib Ula-qabsiga Daljirayaashii Waagii Fiyetnaam. Wadajir ahaan, sharciyadan ayaa ugaa dhigaya sharcidarro shirkadaha la macaamila Dowladda Federaalku inay ku kala takooraan shaqaalaha iyo cadsadayaasha iyada oo ku salaysan dhidibbadha difaacyada xuquuqda ee korka ku qoran. Kala takoorka ku salaysan shaqaale ama shaqo cadsade weyddiisanya, ka hadlaya, muujinaya lacag bixintooda ayaa waliba la mamnuucaya.

### 4. Ayay OFCCP difaacdaa?

OFCCP ayaa difaacda xuquuqda shaqaalaha iyo cadsadayaasha shaqada ee shirkadaha hawlahaa la qabanaya Dowladda Federaalka. Kuwaas waxa ka

mid ah shaqaalaha bangiyada, shirkadaha teknolojiyadda macluumaadka warshadaha hilibka baakeeyaa, dukaamada tafaariiqda, warshadaha wax soo saarka, shirkadaha xisaabaadka, iyo shirkadaha dhismaha, iyo kuwo intaa u dheer.

### 5. Sidee ku garan karaa haddii la i takoorayo?

Kala takoorka qaabab badan noqon kara oo ma aha uun inay ula kac noqdaan si ay sharcidarro u noqdaan. Guud ahaan, waxaa jira laba nooc oo takoorid oo u sharcigu mamnuucayo:

**Ula dhaqanka kala duwani** wuxuu dhacaa markaloo-shaqeeye ula dhaqmo cadsade ah ama shaqaale doorbid ka yar kuwa kale ee xaaladdoodu isku midka ah, iyo kala duwanaanta oo ah aweed jinsiyad, midab, diin, jinsi, nooca, ujeedka isku-tagga, iskuqaoonsiga jinsiga, asal qaran, naafanimada, ama ahaan xaalad daljire hore oo xuquuq difaacan leh.

**Ula dhaqanka kala duwani** wuxuu dhacaa markuu loo shaqeeyeleeyahay siyaasado ama dhaqamo u muuqda cadaalad ah oo si sinnaan loogu dhaqmay laakiin u leh saamayn xun xubnaha galmaada gaar ah ee, jinsi, isir ama koox qowmiyadeed, dadka naafada ah, ama kooxaha kale ee xuquuqda difaacan leh.

### 6. Maxaa ka mid ah tusaalooyinka qaarkood ee kala takoorka ah?

Tusaalooyin qaarkood waxa ka mid ah kala takoorka shaqada oo waxa ka mid noqon kara:

- U dirka shaqada dhammaan shaqaalaha Hisbaanigg ah inay ka shaqeeyaan meel shagaar ah;
- Laca u bixinta dumarka oo ka yar ta ragga la siiyo markay qabanayaan shaqo siku mid ah;
- Ka maafdaysiga shaqaalaha ku hadla lahjadda ee ka badan mararka qaarkood iyo hal dhacdo oo kaliya;
- Ku dallacinta kaliya shaqaalaha qaarkood iyada oo ku salaysan isirkooda ama jinsiogooda;
- Uga baahashada imtixaannada, sida imtixaannada xisaabta ama shuruudaha qaadista culayska, ee aan la xiriirin shaqada laakiin kala sooca cadsadayaasha ka soo jeeda kooxo gaar ah;
- U diidka lacag bixinta bukaan u maqnaashaha shaqaalaha dumarka ah ee ka soo kabanaya ummulitaanka laakiin u oggolaada lacagta maqnaanshaha shaqaalaha ka soo kabanaya qaliinka jilibka, iyo



- Ka eryidda shaqada markay iyadu kala hadasho lacag bixinteeda qof la shaqeeya.

## **7. Maxaan samayn karaa haddii aan aamminsanahay inuu loo-shaqeeyahaygu u aniga i takooray?**

Waxaad ku xerayn kartaa cabasho OFCCP haddii aad u malaynayo in kala takoor lagugu sameeyay shaqada, am markaad cadsanaysay shaqada, sabab ahaan ka soo jeedkaaga sinsi, midab, jinji, ujeedo isku-tag, isku aqoonsi jinsi, asal qaran, naafanimo, xaaladda ahaanta daljire hore oo xuquuq difaakan, ama weyddiinta, ka hadalka, ama muujinta magdhowgG ama in kuwa dadka kale. Uma baahnid inaad xaqiij u ogaado inuu loo-shaqeeyahaagu waa qandaraasle federaal ama ka sii hoos haystae qandraas yahay si aad u xerayso cabasho.

## **8. Sideen ayaan ugu xereeyaa cabasho OFCCP?**

Waxaad xerayn kartaa cabasho kala takoor adiga oo:

- Buuxiya oo gudbiya foom onlayn loo maro barta internetka OFCCP;
- Buuxiya foom adiga oo qof ahaan yimaad xafiis OFCCP; ama
- Ugu soo dir boostada, iimayl, ama faaks foomkaaad buuxisay xafiiska degmeedka OFCCP ee ku lug leh goobta aad ka sheeganayo eedda takoorku inay ka dhacaday.

Foomka waxaa laga heli karaa barta internetka ee <http://www.dol.gov/ofccp/reg/compliance/pdf/pdfstart.htm> iyo iyada oo ah qaab warqad ah dhammaan xafiisyada OFCCP. Si aad u hesho xafiiska ugu dhow meesha aad ku nooshahay, booqo liiska onlaynka ah ee xafiisyada OFCCP ee ku yaal <http://www.dol.gov/ofccp/contacts/ofnation2.htm>.

Waa inaad xusuusnaato inaad saxiixdo foomka cabashada ee aad buuxisay. Haddii aad ka gaabiso yeelidda sidaas, OFCCP ayaa weli kaa aqbali doonta cabashadaada laakiin arrimo baare OFCCP ayaa ku weyddiisan doonaa inaad saxiixdo foomka marka la joogo ballanta waraysiga ee xigta. Cabashooyinka leh eedaynta ku salaysan ku takoorka isirka, midab, diin, jinsiga, ujeedka isku-tagga, isku aqoonsiga jinsiga, ama asal qaran waa in lagu xereeyaa 180 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda eedaynta takoorka, haddii waqtiga ku xeraynta loo dheeray sabab macquul ah mooye. Dhererka waqtiga 180 maalmood ayaa khuseeya cabashooyinka sheeganaya takoorka ka hadalka, muujinta ama weyddiinta arrimaha lacag bixinta. Cabashooyinka leh eedaynta ku salaysan ku takoorka xaaladda daljiraha hore ee xaqa difaakan leh waa in xereeyaa 300 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda eedaynta takoorka, haddii waqtiga ku xeraynta loo dheeray sabab macquul ah mooye.

## **9. Miyuu loo-shaqeeyahaygu iga eryi karaa, ama xilkayga shaqada xoos u dhigi karaa ama iila dhaqmi karaa si ka xun sidii hore maadama aan xeerewayay cabasho?**

Maya. Waa sharci-darro inuu loo-shaqeeyahaagu kaaga aangoosto xereyantaada cabashada ama ka qaybqaadhsaada arrimobaaritaan. Xeerarka OFCCP ayaa kaa difaacya adiga xasaradaynta, cabsigelinta, hanjabaadda, wax ku dirqiga, ama kaga aangoosiga ku dhaqanka xuquuqdaada.

## **10. Ma ku xerayn karaa anigu cabasho OFCCP iyo Guddiga U Sinnaanta Fursadaha Shaqada / Equal Employment Opportunity Commission (EEOC)?**

Haa, haddii aad ku xerayso labadaba OFCCP iyo EEOC, cabashada yaay baari doontaa hay'adda ku habbooni. Mararka qaarkood, OFCCP iyo EEOC ayaa go'ansam kara inay wada shaqeeyaan si ay u soo baaraan cabashadaada.

OFCCP ayaa guud ahaan haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka markay arrimo u muuqdaan inay jiraan kala takoor saameeya koox shaqalahaa ama codsadayaasha ka tirsan. OFCCP ayaa guud ahaan haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka ee ku eedanaya takoored ku salaysan qofka u jeedka isku-tagga, isku aqoonsiga jinsiga, naafanimada ama xaalad daljire hore oo xuquuq difaakan leh. OFCCP ayaa guud ahaan, haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka ee sheeganaya kala takoor ku salaysan markuu qof weyddiinayo, ka hadlayso ama shaaca ka qaadayo arrimaha ku saabsan lacag bixinta shaqada.

## **11. Maxaa dhici doona haddii ay jirto helitaan inaan ahaa dhibbane ka takoor shaqo?**

Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato xallin kugu meelaysa booskii ay hayd inaad qabato haddii aanu kala takoorku dhici lahayn. Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato in lagu shaqaaleeyo, lagu dallacsiiyo, shaqada dib lagugu soo celiyo, ama shaqo kale lagugu hagaajiyo. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u mudnaato helitaan lacag bixinta kuugu maqan shaqada, lacag horay lagaa siyo, lacag u kordhin ama arrimo qaarkood oo iskugu jira xallimaas. Waxa intaa u dheer, OFCCP ayaa ku kici doonta sidii shirkadda looga hor istaagi lahaa ama looga tirtiri lahaan u tixgalinta qandaraasyada federaalka ee mustaqbalka ama in shirkadda in laga noqdo heshiyadda qandaraasyada iyo wax la hal maala ee haatan jira, haddii ay OFCCP ku hesho qandaraaslaho federaalka ama kuwa ka hoos shaqeeyaa inay ku xadgudbeen midkoodna sharciyadeeda.

*Wixii macluumaad dheeraad ah:*

THE U.S. DEPARTMENT OF LABOR

Office of Federal Contract Compliance Programs

200 Constitution Avenue, NW

Washington, D.C. 20210

I-800-397-6251

TTY: I-877-889-5627

[www.dol.gov/ofccp](http://www.dol.gov/ofccp)

Fadlan la soco inay xaashidan xaqiijdu bixinayso macluumaad guud. Looguma talagalin inuu baddalo meesheedi sharciyada iyo qawaaniinta dhabta ah ee ku saabsan barnaamijka halkan lagu soo qaaday.

Dib loo habeyay Sebtember 2016

